Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda
Qoraal Kooban

09

12 | 2014

# Dareenka Dadka Muqdisho ee Dimuqraadiyadda iyo Doorashooyinka

## Qodobbada ugu muhiimsan

- Inta badan shacabka Muqdisho muhiim ayay u arkaan qabsoomidda doorashooyin dimoqraadi ah, waxaana ka go'an inay codkooda dhiibtaan haddii doorasho la qabto.
- Waxaa jirta qanacsanaan la'aan baahsan oo ka dhan ah hannaanka 4.5 ee awood qaybsiga beelaha, waxayna shacabka Muqdisho qabaan in kuraas loo qoondeeyo beelaha laga tirada badan yahay iyo haweenka.
- Xaaladda amniga ayaa saamayn toos ah ku leh sida loo arko suurta-galinimada doorashooyinka. Haddii ay amni darradu sii socotana waxay saamayneysaa u diyaar garowga doorashooyinka.

## Raad-raac

Duqa Magaalada Muqdisho, Xasan Maxamed Xuseen 'Muungaab' ayaa bishii July 2014 waxa uu ku dhawaaqay inay ka go'an tahay in 2015-ka ay doorashooyin dimuqraaddi ah ka qabsoomaan gobolka Banaadir si loo doorto qofka baddelaya isaga, iyo guddoomiyayaasha degmooyinka-ba. Sanadka 2016-ka, waxaa loo muddaysan yahay inay dhacaan doorashooyin qaran oo baarlamaani ah sida ku cad Hiigsiga Dowladda Federaalka ee 2016.

Inkastoo uu sii kordhayo welwelka bulshada caalamka, haddana Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) uma muuqato mid diyaar u ah inay qirato inay sii libdhayaan fursadaha keeni kara in 2016-ka ay Soomaaliya ka dhacdo doorasho xor ah oo xalaal ah. Tallaabooyin badan oo ka horreeya doorashooyinka lagama maarmaanna u ah ayaanba dhankooda loo dhaqaaqin, mana muuqadaan dadaallo arrimahaas lagu xaqiijinayo.

Dhanka kale, iyada oo tan qudheedu ay tahay mid han-weyni ka muuqato, haddana hannaan doorasho ah oo Muqdisho ka dhaca waa mid suurtagal noqon kara. Waayo tallaabooyin ayaa dhankaas loo qaaday; qorshe shaqo ama khariidad ayaa la jeexay, waxaana wadahadal lala furay dhinacyo gacan ka geysan kara hirgalinta doorashooyinka gobolka Banaadir.

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda oo gacan ka heylaya Maamulka Gobolka Benaadir, ayaa dhawaan gabagabeeyey xog uruurin ballaaran si fikrad looga qaato dareenka ay dadka Muqdisho ka qabaan doorashooyin dimuqraaddi ah.

Isugeyn 1633 qof oo ku kala nool 17-ka degmo ee magaalada Muqdisho ayaa ka qayb qaatay cilmibaris ay sameeyeen 15 xog-ururiye. Xog-ururin sahan ah ayaa Machadku ku billaabay bishii April, taas oo laga sameeyey degmooyinka Shangaani, Xamarweyne, Xamar Jajab iyo Waaberi. Bishii October-na, 13-ka degmo ee kale ayaa laga sameeyey xog-ururinta.

Waxaa ku xigey kulammo xog-warran iyo fikrad wadaag ah oo lala yeeshay qaybo badan oo kamid ah saamiyleyda siyaasadda ee arrinta doorashooyinku khusayso si loo hubiyo xogta ka soo baxday cilmi-baarista iyo si loo kordhiyo fahamkeenna iyada oo markaa cilmi-baarista laga eegayo dhinaca raad-raaca, u kuurgalka iyo weydiimaha.

Inkastoo xogta laga ogaaday Muqdisho aan loo tiirin karin Soomaaliya oo dhan, haddana maaddaama ay tahay magaalada ugu weyn dalka, waxaa suurtagal ah in dareenka Muqdisho uu muujinayo dareen guud oo Soomaaliya oo dhan ah oo la xiriira doorashooyinka iyo dimuqraadiyadda.

Waxaan rajeyneynaa in cilmi-baaristani ay ku dhiirri galin doonto masuuliyiinta inay sii wadaan qorshayaasha ku aaddan doorashooyinka gobolka iyo in xogta aan soo bandhignay ay gacan ku siiso inta taladu ka go'do inay ku howl-galaan hannaan dhiirri geliya ama ku dayasho leh, si doorashooyin gobol iyo kuwa degmo-ba ay uga hirgalaan meelo kale oo Soomaaliya ah.

**Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda** waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay.


## Ahamiyadda Doorashooyinka

**“Hadii Muqdisho ay bilowdo doorashooyin, gobollada kale waa ay samaynayaan.”**

Xog-ururintu waxa ay muujisay taageero baaxad leh oo loo hayo in doorashooyin ay ka dhacaan Muqdisho. 91% dadkii jawaabaha ka bixiyey cilmi-baarista waxay sheegeen inay muhiim u arkaan in la qabto doorasho Muqdisho ah. (28% waxa ay ku tilmaameen arrin muhiim ah, 64% waxay ku tilmaameen arrin aad muhiim u ah). Afartii qofba saddex, ama 76% dadkii xogta laga uruuriyey waxa ay sheegeen in ay rajeynayaan inay doorashooyin Muqdisho ka dhacaan 2015-ka. Waliba in kasta oo si buuxda ay dadka Muqdisho uga dharagsan yihiin caqabadaha waaweyn ee horyaalla doorashooyin, haddana, aqlabiyad buuxda (86 boqolkiiba) ayaa sheegay inay u badan tahay (15%) ama ay aad ugu badan tahay (71%) inay ka qayb qaataan haddii doorashooyin qabsoomaan.

Arrinta amniga oo ah mid ku gadaaman xaaladda Muqdisho ayaa ah mid saamayn baaxad leh ku leh dareenka laga qabo doorashooyinka. 70% dadka la waraystay ayaa sheegay in sii socoshada amni darradu ay tahay midda ugu weyn ee caqabad ku noqon karta qabsoomidda doorashooyin. Sidii aan uga faalloonnay qoraalkayagii koobnaa ee aragtiyada amniga iyo garsoorka ee Muqdisho, nooca amni darrada ee Muqdishu waa mid sanooyinkan danbe isbeddel ku socotay, wejiyo cusubna la soo baxday. Inkastoo dadka Muqdisho ay dhici karto inay guud ahaan dareemeen amni sannadkan marka la barbar-dhigo sanooyinkii ka horreeyey, qaraxyo ismiidaamin ah oo aan loo aabo-deyin, bambooyin gacanta laga tuuro iyo dilal qorshaysan ayaa ah kuwo weli keenaya khataro weyn.

Amni darradu dhab ahaantii, waa ay adkayneysaa qaban-qaabada doorashooyin magaalada oo dhan ah. Weerarrada beegsiga ah ee ku aaddan dadka codaynaya, saraakiisha doorashooyinka, kormeerayaasha iyo ciidamada amniga sugaya maalinta doorasho la qabto ayaa saamayn ku yeelanaya sida doorashadaas loogu soo baxo. Ruux kamid ahaa dadkii xog-ururinta lagu waraystay ayaa waxa uu weydiiyey: "Dadka ma waxay ka welweli doonaan amniga naftooda, misa doorashooyinka?"




Ku baraarugsanaanta in doorashooyinku ay keeni karaan khataro wax dumin kara waa ay ka muuqatay doodaha aan u furnay dad xul ah oo aan la wadaagnay arrimaha ka soo baxay xog-uruurinta. Qof dadkaas kamid ah ayaana tilmaamay, isaga oo soo xiganaya colaaddii Kenya ka qaraxday kaddib doorashooyinkii 2007-08, wuxuuna yiri: "Doorashooyinku badanaa ma aha kuwo miro dhaliya, mararka qaarkood waxay keenaan isku-dhac sidii khilaafkii ka dhashay Kenya kaddib doorashadii Kibaki iyo Odinga." Waxaase fiiro gaar ah mudan in 37% dadkii xogta laga uruuriyey ay u arkaan doorashooyinku inay yihiin kuwa muhiim ah wax ka qabashada amniga.


Markii la weydiiyey in dimuqraadiyaddu ay la jaan-qaadi karto dhaqanka Soomaalida, boqolkiiba 73 ayaa ku jawaabay inaysan is-diiddaneyn. Waxaase muuqata in ku dhawaad saddex meelood, mid (27%) dadka jawaabay ay u arkaan inaysan dimuqraadiyaddu is oggolayn dhaqanka Soomaalida. Farqiga ku jira boqolkiiba dadka sheegay inay u arkaan doorashooyinka arrin muhiim (91%) iyo kuwa u arka in doorashooyinku ay la jaan-qaadi karaan dhaqanka waxay muujinaysaa in ay jiraan qaar dadka ka mid ah oo u arka doorashooyinka arrin muhiim ah haba ahaadaane kuwa dhaqanka Soomaalida aan la jaan-qaadi karin.

Ku dhawaad boqolkiiba 16 dadka xog-ururinta laga qaaday ayaa aaminsan in dimuqraadiyaddu ay tahay arrin islaamka ka soo horjeedda ama cilmaaniyad ah. Sida aan ka dheehannay wareysiyadii aan qaadnay, Soomaalidu shaki weyn ayay ka qabtaa wixii ay fara-galin shisheeye u aragto. Taas oo ay weheliso baahidda ay baahday in waayahan danbe diinta loo fasiro hab xag-jirnimo ah ayaa keeni karta in dadka qaar ay u arkaan dimuqraadiyadda aragti reer galbeed aan la jaanqaadi karin ama ka hor imaanaysa dhaqanka iyo/ama diinta. Dareenkaas waxaa ku nuuxnuuxsaday ka qayb-gale kulamada aan qabannay ee xog-baarka ah kaas oo yiri: "Kama soo horjeedno wax kasta oo reer galbeedka ka yimaadda...waxaanse kasoo horjeednaa in reer galbeedku ay nagu khasbaan waxaay aaminsan yihiin."

## Matalaad

**“Haddii maamulka gobolka si dimuqraadi ah lagu soo doorto iyada oo la tixgelinayo oo kaliya mudnaanta musharraxa, marka laga eego aqoonta taas waa la fahmi karaa, haddiise miisaanku yahay qabiilkee ku nool xaafad kasta, markaas xaalku sidii uu horay u ahaa ayuun buu ahaan.”**


**“Waxaa jira beelo hadda xildhibaano ku leh baarlamaanka, horayna aan xildhibaanno u lahaan jirin. Haddii doorasho la qabtana aan heli doonin kuraas. Waa in kuraas loo qoondeeyaa beelaha iyo kooxaha nugul ama xaqooda aan helin.”**



Xog-ururintu waxa ay bannaanka soo dhigtay in dadka Muqdisho ay si cad u doonayaan in karti laga hor mariyo qabiilka, iyaga oo oggol in la dhowro xuquuqda iyo matalaadda haweenka iyo beelaha laga badan yahay. Tusaale ahaan mar si toos ah loo weydiiyey inay doonayaan ama raalli ka yihiin hannaanka 4.5 ee is-matalaadda ee dowladda Soomaaliya ku saleysan tahay, aqlabiyad cad (boqolkiiba 72) waxa ay muujiyeen in aysan ku qanacsanayn hannaankaas.

Hannaanka awood qaybsiga ee 4.5 waxaa markii ugu horreysay lagu allifey shirkii Sodere iyada oo markaas loo arkay hab xaq-soor ah oo talada siyaasadda looga qayb galinayo dhammaan beelaha Soomaaliyeed. Habkani waxa uu siinayaa matalaad is le'eg afarta qabiil ee waaweyn ee Soomaaliya ee Daarood, Dir, Digil iyo Mirifle (Raxanweyn) iyo Hawiye -- iyo bar tirada matalaadda ee beelahaas oo loo qoondeeyey beelaha lagu summadeeyay in laga tira badan yahay sida Jareerta, Banaadiriga iyo Madhibaanka.

Markii la weydiiyey ka qayb galayaasha cilmi baarista waxa ay u malaynayaan sababta dadka badankiisu uga soo istaageen habka 4.5, waxa ay ku jawaaben in hannaankani uu noqday mid xidideystay iyada oo "qabiil kastaa uu rabo xil kasta oo uu mar qabtay" taas oo keentay hadda in la aaminey in madaxweynaha iyo ra'iisul wasaaraha ay ku xiran tahay dadka qabiil ahaan ah Hawiye iyo Daarood, iyada oo aan la eegayn yaa mudan. Haddii dimuqraadiyaddu ay tahay mid ku dhisan xisbiyo siyaasadeed, mid kamid ah dadka la ogaal waraystay ayaa tilmaamay, "in doorashooyinku ay wiiqi karaan ku tiirsanaanta qabiilka."




Dareen guud ayaase jira oo la arko ahmiyadda ay leedahay in matalaadda dadka laga badan yahay aan la duudsiin. 80% dadka ka qayb qaatay cilmi baaristan ayaa taageeray hirgalinta hannaan lagu xaqiijinayo in dadka laga badan yahay ay xaqooda matalaadda helaan iyaga oo dadka la waraystay ay dhanka kale dalbanayaan in lasii baahiyo tixgalinta mudnaanta, taas oo muujinaysa bisaylka siyaasadeed ee dadka Muqdisho, ahna arrin yididiilo ka muujinaysa mustaqbalka siyaasadeed ee magaalada, haddii loo diyaariyo hannaan hufan.

Sidoo kale, aqlabiyad aad u badan (boqolkiiba 85) dadka xog-ururintan ka qayb qaatay ayaa tibaaxay inay lagama maarmaan tahay in haweenka loo qoondeeyo kuraas u xaqiijinaysa matalaad iyo inay xaqooda helaan, marka la gaaro doorashooyinka soo socda. Taas qudheeda waxaa laga garanayaa ilbaxnimada maamul ee Muqdisho inay sarreyso, waayo Soomaaliya waa bulsho uu raggu dhaqan ahaan majaraha u hayo.

## Caqabadaha

**"Sababta ay dalalka reer galbeedku ugu guuleysteen hirgalinta doorashooyin iyo dimuqraaddiyad shaqaynaysa waxay tahay iyaga oo haysta kaabayaashii, hab-raacyadii iyo hanankii hawshaas fududaynayey. Waxaan u baahan nahay in aan marka hore diyaarsanno kaabayaashaas inta aannaan ku degdegin doorashooyin horseeda carqalado."**

In kasta oo ay muuqdaan rajo-qabid baahsan iyo taageero loo hayo doorashooyin, xaqiiqadu waxay tahay in haddii aan xal loo helin heerka amni darro oo hadda jira, inay adag tahay suurtagalnimada inay dhacdo doorashooyin amni ah, xor ah oo natiijadooda lagu kaalsoonaan karo. Ku dhawaad rubuc dadkii la wareystay (24%) ayaa sheegay inaysan u badneyn in doorasho dhacdo sanadka 2015-ka.

Xog-ururinta waxaa la sameeyey kahor intii aanay dhicin khilaafkii siyaasadeed ee hareeyay madaxda dowladda federaalka. Sidaas oo ay tahay, 11% dadka cilmi baarista qaybta ka ahaa waxay sheegeen inay madaxda siyaasadda u arkaan caqabadda ugu weyn ee hortaagan inay doorashooyin dhacaan. Welwel laga qabo gaabinta laga gaabiyey xaqiijinta Hiigsiga 2016-ka ayaa isna soo badanaya.

Dadaallada la isku dayey in hannaanka 4.5 lagu daro sugidda ama xaqiijinta xaqa haweenka sida isku daygii loo bixiyey Beesha Lixaad, miro dhal ma noqon. Mabaa'diidii Garoowe waxaa kamid ahaa qodob tilmaamaya in kuraasta baarlamaanka 30% loo qoondeeyo haweenka. Markiise baarlamaanka la dhisay, haweenka waxaa u suurto gashay inay hantaan kala bar intii loo qoondeeyay.

Jawaabaha laga bixiyey su'aal ahayd sida madaxda gobollada iyo degmooyinka lagu magacaabi karo, waxay ishaarooyin ka bixinayaan hannaanada badiilka noqon kara dadkuna u arki karaan caddaalad ama xalaal haddii doorasho dhici waydo. Inkastoo ku dhawaad kala bar (boqolkiiba 43) dadka cilmi baarista loo waraystay ay si adag u sheegeen in hannaanka kaliya ee xalaasha ah uu yahay doorasho toos ah, haddana boqolkiiba 27 ayaa tilmaamay, in dad degmooyinka iyo gobolka magac ku leh loo idman karo inay madaxda soo xulaan, halka boqolkiiba 17 ay arkaan in odayaasha dhaqanku ay masuuliyaddaas qaadi karaan.

## Gunaanad

**"Waa in la helo nidaam doorasho, muhiim ma ah inuu noqdo mid dhammeystiran"**

In sanadka 2016 la qabto doorashooyin dimuquraadi ah oo si wanaagsan uga dhaca Soomaaliya oo dhan aad ayey u adag tahay, maadaama wakhtiga dhiman uu aad u yar yahay. Wadatashi aan la sameynay qaybo kamid ah bulshada waxay noo sheegeen inuu jiro dareen ah in wakhtiga dhiman aanuu ku filnayn in doorasho sax ah ka dhacdo Soomaaliya. Waxaase suurtagal ah in la qabto doorashooyinka golaha deegaanka Muqdisho haddii lagu guuleysto in wax laga qabto ammaanka, shacabkuna taageeraan

howlaha nabadeynta.

Sidaas oo ay tahay, haddii ay dhacdo doorasho xor ah, macnaheedu ma ahan in dimoqraadiyadi ka dhaqan gashay Soomaaliya. Doorashooyinku waa unug kamid ah qorshaha dhaqan galinta demoqoraadiyadda Soomaaliya, kaasoo u baahan wakhti dheer iyo in hoggaanka siyaasada ay ka go'an tahay inay dhaqan galiyaan, lana shaqeeyaan shacabka. Laakiin waxaa la dhihi karaa doorshadu waa tallaabada ugu horeysa, aasaaskana u ah qorshaha dimoqraadiyadeynta.

Go'aanka duqa Magaalada Muqdisho ee ku aaddan in qofka isaga beddeli doona uu noqdo qof ay doorteen shacabka waxay suurto galisay in Maamulka Gobolka Banaadir uu taageero xog-uruurintan. Waxaana la rajeynayaa in casharrada laga bartay cilmi baaristaan loo kaashado qorshaha dhaqan galinta dimoqoraadiyadeynta magaalada Muqdisho, iyo inay dhiirri galiso in hannaanka dimoqraadiyaddu uu ku baaho dalka intiisa kale.

Rajada iyo hamiga ay qabaan shacabka magaalada Muqdishu waa mid cad. Waxaa kale oo ay muujiyeen inay aad u fahamsan yihiin caqabadah jira. In la qabto doorashooyin xor ah oo xaq ah waxay ku xiran tahay in hoggaanka siyaasadda Muqdisho ay dhab ka tahay dhaqan galinta mabaadiida dimoqoraadiyadda, kana shaqeeyaan abuurista jawi lagu dhaqan gali karo.

## Talooyin tixgalin mudan

**Nidaamka Doorashada:** Maadaama ay si aad ah dadka u taageersan yihiin doorashada, waxaa habboon in xoogga la saaro sidii lagu hirgelin lahaa intii laga hadli lahaa inay doorasho dhici karto iyo in kale. Hannaanka doorashooyinku wuu kala duwan yahay. In la doorto hannaanka ugu fiican ee lagu dooran karo madaxda heer gobol iyo heer qaran waxay u baahan tahay in si aad ah looga taxaddiro iyo sidoo kale latashiga dhammaan dhinacyada ay khuyseyso.

Inkastoo uu jiro wacyi ku aaddan muhiimadda ay leedahay in la siiyo saami ay dowladda matelaad uga helaan dadka laga badan yahay iyo haweenka, haddana awood-qeybsiga ku dhisan hab beeleedka 4.5 ma ahan mid shacabku ku qanacsan yahay, wuxuuna u baahan yahay in dib looga fikiro. Siyaasad ku dhisan mabda', sida axsaab siyaasadeed, ma ahan mid la jaanqaadi karta nidaamka hadda jira ee qabiilka lagu dhisay hay'adaha dowliga ah.

Hababka lagu xaqiijiyo matelaadda dadka laga badan yahay ee siyaasadda heer qaran waxay u muuqataa in ay ku kooban tahay deegaanno cayiman oo ay degan yihiin. Habab lamid ah kuwaas in laga dhaqan geliyo Muqdisho waxa laga yabaa inay noqoto mid ay adkaato in la hirgaliyo ama aan la rabin, taas oo sii xoojin karta farqigii jiray. Tixgalin waa in la siiyaa aasaasidda hannaan ay dadka laga badanyahay uga qeybgeli karaan siyaasadda gobollada.

Inta badan dalalka soo koraya waxay qoondeeyaan saami si ay u ilaaliyaan matalaadda dumarka. Aragti ahaan, sharci ayaa loo dejiyaa si loo xaqiijiyo saamiga dumarka xilliga doorashooyinka. Xaqiijinta saamigaas waxa ay kordhin kartaa sinnaanta jinsiga heer gobol.

**Amni darro:** Muhiimadda ay leedahay in la adkeeyo ammaanka Muqdisho waa sadar muuqda. Iyadoo la tixgalinaayo yididiilada shacabka ee hadda jirta ee ku aaddan doorashooyinka Muqdisho, iyo rabitaanka dadka inay codeeyaan, amni darrada jirta ma ahan in loo hakiyo diyaar garowga doorashooyinka. Maadaama Somaliland ay hirgalisay doorashooyin dhowr jeer, Muqdisho-na way qaban kartaa doorashooyin. Casharrada laga barto khibradda Somailand ay u leedahay doorashooyinka iyo hannaanka ay ku xalliso amnidarrada waa in la xoojiyaa.

Kahor intii aanuu soo if-bixin is-maandhaafka siyaasadeed ee soo kala dhex-galay madaxda qaranka, waxa jiray walaac laga qabay sida ay dowladda u xakameyso sugidda amniga, sida ay dhab uga tahay sameynta dib u habeyn siyaasadeed, iyo awoodda ay u leedahay ka dhabeynta ahdaaftii Hiigsiga 2016-ka. Al shabaab iyo shabakado danbiilayaal ah oo kale ayaa ka faa'iideysan doona khalkhalka siyaasadeed iyo ka weecashada dhabbihii loo jeexay Dowladda Federaalka a markii la aasaasay sanadkii 2012-ka.

**Wacyi-galin Bulsho:** Ugu dambeyntii, waxaa loo baahan yahay in la sameeyo olole baraarujin dadweyne/ wacyi-galin bulsho si sare loogu qaado wacyiga shacabka ee ku aaddan doorashooyinka, qiimaha dimuqraadiyadda, iyo in muwaadinka la fahamsiiyo xuquuqda uu leeyahay iyo waajibaadka saaran. Dadaal waa in lagu bixiyaa dadka aaminsan in dimuqraadiyadda aanay la jaanqaadi karin dhaqanka Soomaalida iyo sidoo kale kuwa aaminsan in aanay la jaanqaadi karin diinta Islamka.

Waxaa laga yaaba in dadka qaar ay dimoqraadiyad la xiriiriyaan ajande ajnabi ah, balse dabciga ruuxa Soomaaliga ah waa mid leh astaamo dimoqraadi ah, waxaana sidaas tilmaamay taarikhyahannadii soo maray gayiga Soomaalida muddooyiinkii hore. Sida uu sheegay mid kamid ah ka qeyb galayaasha cilmi-baaristan: "Islaamku waa caddaalad, xaqsoor, latashi iyo maamul aasaskiisuna yahay heshiis bulsho." Ololaha baraarujinta dadweynaha waa in lagu daraa macluumaad ku saabsan dhaqanka dimuqraadiyadeed ee ay leeyihiin Soomaalida iyo mid ay diinta Islaamka leedahay.

**Daraasaddan waxaa taageertay hey'adda Interpeace.**

Akhristayaasha waxaa la ogeysiinayaa inay daabici karaan qoraalkan, haddii aaney ka ganacsaneyn. Maadaama uu Machadka Heritage leeyahay xuquuqda qoraalka, waxaa laga codsanayaa ciddii dibu u daabacda inay xusto Heritage, isla markaana Machadka lasoo socodsiiso.

**© Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda. Qoraalkan waxaa lagu daabacay hannaanka Creative Commons Attribution, qaybtiisa aan macaash-doonka aheyn (CC BY-NC 3.0)**